


# MACHADKA



# ACCESS



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

**ACCESS** waa barnaamij tacliimeed adag oo loogu talagalay ardayda hibada aadka ah leh ee dhigata fasallada 1 ilaa 8. Barnaamiju wuxuu bixiyaa manhaj horumarsan iyo wax kordhin labadoodaba si loo sameeyo waxbarasho da'ahaan ku habboon isla markaana ah loolan adag leh oo loogu talagalay ardayda awoodda sare leh. ACCESS waxay bixisa:

- Waxbarasho ay helaan dadka isku faca ah ee garaadka badan
- Koox ahaan dadka la iskugu keeno iyadoo la eegayo heerka tacliimeed ee maadooyin kasta
- Fursaddo credit-ka dugsiga sare lagu helayo oo ah sayniska, xisaabta iyo luqadaha adduunka
- Fursaddo loogu talagalay waxbarashada madaxa bannaan

Ardayda dhigata fasallada 1-5 waxay wax u bartaan iyaga oo koox ahaan isku jira waxayna inta sanadka lagu jiro waxbarasho ka helaan hal macallin oo ah fasalka aasaasiga.

Wax kordhintu toddobaadlaha ah waxaa ka mid ah PE, Tiknoolajiyada, Isbaanishka, Muusikada, Heesaha, and Mandarin.

Ardayda dhigata fasallada 6-8 waxay maalin kasta leeyihiin lix xiisadood oo waxbarasho, taasi oo hadba mid la qaadanayo fasallada muhiimka ah ee ay ka mid ka yihiin xisaabta, Ingiriiska, cilmiga bulshada, luqadda adduunka (Mandarin iyo Isbaanish) iyo sayninka, iyadoo ay dheer yihiin maadooyin wax lagu kororsanayo oo ah tikloonajiyada, hoggaaminta, caafimaad qabka, ama kordhintu sayniska.

## NOOCYADA XIRFADAH KALA DUWAN

Macallimiinta ACCESS waxay wax ku baraan aragti heerkoodu sarayso isla markaana xawli sare ku socota oo ku habboon ardayda hibada leh, taasi oo ka dhigaysa in loolan adag la geliyo isla markaana laga qayb geliyo.

Macallimiinta ACCESS waxay sidoo kale fahamsan yihiin baahiyaha bulsho iyo dareen ee u gaarka ah ardayda hibada leh.

## WAALIDIINTA KA QAYB QAADANAYSA

Waaliidinta sida firficoon tabaruc ahaanta uga qayb qaadanaysa waxay ardayda u fidiyaan Heeso loogu talagalay fasallada 1 – 5, koox u qaabilsan cayaarta Qalabka Iswada ee Lego, Barnaamij Adeeg oo Bulsho, cayaarta shaxda 'chess', Beer Dadweynaha loogu talagalay iyo hawlo kala duwan oo bulshada la xiriira sida xafladaha qalabka cayaarta barafka 'roller skating' aflaan habbeenki la fiiranay, qoobka cayaar fasalka dhexe loogu talagalay iyo bandhig xirfadeed.

## HAWSHA

Machadka ACCESS hawshiisu waa in uu abuuro sidoo kalena joogteeyo jawi waxbarasho oo carruurta hibada leh ay bulsho ahaan, dareen ahaan, iyo tacliin ahaan ay barwaqaqo ku gaaraan isla markaana haystaan fursad ay ku gaaraan awoododa buuxda.

# A

Manhaj la dedejiyay



# C

Abuurida & horumarinta xirfadaha, awoodaha iyo hal abuurnimada

# C

Horumarinta dabeeccada & bulsho

# E

Ogaanshaha & helitaanka shakhsiyeed

# S

Is-tilmaanka, loolanka shakhsiyeed ee la xiriira wanaaga

# S

Adeega ku aadan bulshada & bulsho dulqaad iyo xigmad leh

"ACCESS wuxuu bixiyay wixii uu wiilkaygu u baahnaa si uu barwaalo u gaaro...macallimiinta oo ballaariyay awoodiisi, jawi xusa shakhsiyadiisaniyo bulsho arday ah oo wadaaga dano."

Pamela & Thomas,  
Waalidiinta ACCESS

**ACCESS** wuxuu ku dadaalaa in uu dhiirigeliyo horumarka ardayda oo dhan. Barnaamiju wuxuu taageeraa garaadka iyo sidoo kale koritaanka shaqsi ee ardayda hibada leh isaga oo bixinaya waxbarasho heer sare ah oo lagu aqoon sanayo habab waxbarasho oo kala duwan iyo hibada la leeyahay kaasi oo ka jira jawi ababin leh oo ay helayaan dadka isku faca ah.

## QORSHAYAAL KALE OO WANAAGSAN

Manhajka la xiriira barnaamiju wuxuu dhownraa nidaamyada ku salaysan shuruudaha looga baahan yahay Waaxda Waxbarashada ee Oregon iyo Dugsiyada Dadweynaha Oregon si loo buuxiyo baahiyaha ardayda ka kor martay dhammaan ama inta badan qiyaasaha. Heerarka fasal ee kala duwan oo dhan, ardayda ACCESS waxaa la qoraa fasallada xisaabta iyadoo la eegayo heerka awoodooda, halkii laga eegi laha heerkooda fasal ama da'dooda. Qaar ka mid ah ardayda waxaa laga yaabaa in ay u baahdaan in shaqsi ahaan la kabو si loo buuxiyo baahiyoo gaar ah. Qaar ka mid ah ardayda waxaa laga yaabaa in ay u baahdaan in shaqsi ahaan la kabо si loo buuxiyo baahiyoo gaar ah.

## AQBALAADA

ACCESS wuxuu aqbalaa ardayda Xirfadda iyo Hibada leh ee keenta qiyaasta dhibcaha ah 99-naad marka la eego heerka boqolkiiiba ee imtixaanada caadiga ee qaranka ee leh xirfad u dhalasho iyo/ama guul ka gaartay mid ka mid ah ama dhammaan meelaha soo socda: wax akhriska, xisaabta, ama awooddha garasho.

Barnaamiju wuxuu habboon yahay ka kor martay dhammaan ama inta badan qiyaasaha. Intaasi waxaa dheer, in ay ACCESS u adeegto baahiyaha ardayda aan hal mar wax wada qabin karin sida maadooyinka dhexdooda. Awoodaha

Ardayda kale waxaa laga yaabaa in u baahdaan taageero dheeraad ah oo laga siiyo ishabaynta iyo maareynta wakhtiga.

Macallimiintu waa kuwo aqoon u leh baahiyaha kala duwan ee ardaydu qabaan taasi oo la xiriirta dadka hibada leh waxayna ku dadaalaan in qorshayaal u sameeyaan.

ACCESS wuxuu ka qayb qaataa Tartanka Higaada ee National Geographic "National Geographic Bee", Tartanka Xisaabta ee Maraykanka "American Math Competition", Tartanka Cayaarta Sayniska "Science Bowl", Tartanka Higaada ee Scripps "Scripps Spelling Bee", Carwada Caalamiga ah ee Sayniska iyo Injineernimada ee Intel "Intel International Science and Engineering Fair" iyo hawlo kale.

yo baahiyaha labadoodaba ee qofka la dooranayo ayaa mudnaanta la siiyaa inta lagu gudo jiro nidaamka codsiga.

ACCESS wuxuu aqbalaa codsiyada laga helo dhammaan ardayda ku nool xuduudaha Dugsiyada Dadweynaha Portland. Nidaamka aqbalaadu waa mid u hoggaansan dhammaan qawaaniinta iyo xeerarka federaalka iyo gobolka oo ay ka mid yihiin bakhtiyaanasiibka ka socda ardayda u qalanta.

Waxyalaha uu ka booban yahay codsigu iyo macaluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa website-ka ACCESS: [www.pps.net/access](http://www.pps.net/access)

